

# Hilimada ilaa Heer Sare

Somali

## Dugsiyo tayo sare, beelaha sii xoogsan, iyo aflaxaad tacliimeed ee ardayda idil

Tani waa [qorshe dhiiran](#) ee balaarinaya waxbarashada tayada sare ee ardaydeena idil.

- Waxan carifnay barnaamijyo shaqaynaya – dugsiyo guul gaadhaya oo natiijooyin layaab leh ee waalidku xiise weyn u hayaan – oo dib isugu dayanaya iskuna balaarinaya xaafadaha idil ee Boston.

- Qorshuhu wuxu abuurayaa sideed barnaamijyo K-ila-8 oo cusub (waa 6,000 kuraas cusub, oo ah korodhsiiin 60%) si loo siiyo qoysaska kagudubyo tiro yar (*transitions*) iyo joogteyn waxbarasho oo dheeri ah.

- Waxan siin doonaa qoysaska gelitaan sii badan xaga dugsiyada Tijaabada (*pilot schools*), oo ugu yaraan 2,000 kuraas cusub ee dugsiyada tijaabada (waa korodhsiiin 25%).

- Waxan ognahay in qoysaska kala doorashooyin leeyihiin, oo si loogu tartamo suuqyada maanta jira ee laysku wada haysto, waa inaan daboolaan baahiyaha qoysaska oo sii wanaajinaa adeegyada aan siino. Waxan goosanay inaan Dugsiyada Dadweynaha Boston ka dhigno kuwa doorashada kowaad qoysasku ugu sameeyaan waxbarashada ilmahooda.

[Qorshuhu wuxu ku dhisan yahay magaca umadeed in Boston tahay meesha wax iktiraacda .](#)

- Waxan abuuraynaa barnaamijyo cusub oo daboolaya bahiyaha isbedelaya ee ardaydeena, qoysaska iyo beelaha.

– sida Xarunta Kagudubka? Dugsi Ugoynta (*Transition/Truancy*), Xarunta Ardayda Cusub (*Newcomer*) ee qaxootiga ah, dugsiyada dadweynaha ee Montessori iyo sida barnaamijyada Shahaadada Caalamiga ah (*International Baccalaureate*).

- Qorshuhu wuxu ku nuuxnuuxsadaa “qalinjebinta dadkoo idil” (*graduation for all*) xaga barnaamijyada cusub iyo kuwa la sii balaadhiyey ee dugsiyada sare oo bixinaya koorsooyin u diyaariya ardayda gelitaanka kuliyaadeed iyo guusha shaqooyinka mustaqbalka.

- Wuxu abuurayaa adeegyo cusub ee nabadgelyo saafi ah si loo taageero ardayda halista weyn ugu jira inay hadhaan – iyo in dib loo soo cesho kuwa dugsiyada ka tegey laakin doonaya inay soo noqdaan.

[Qorshuhu wuxu waajahayaa xaqiiqooyinka dhaqaale ee cusub.](#)

- Waqtiyadan dhaqaaluhu adkaaday, waa inaan si caqligal ah u isticmalaan agabyadeena. Iyadoo siciradu sii kacayaan tirada ardayda dugsiyaduna sii yaraanayso, iskuma dejin karo “meheradu waa sideedii” (*business as usual*).

- Qorshuhu wuxu sare u qaadayaa kartida iyo mas’uulnimada lacageed iyadoo shan dugsi dhismahoodii la xidhayo, si looga jawaabo dugsigelida sii yaraanaysa.

- Iyadoo qorshahan la filayo inuu xakameeyo kharashka ilaa \$13.8 milyan shanta sano ee soo socd, lacagta waxa dib loogu maalgelinayaa mustaqbalka caruurteena.

- Qorshuhu wuxu kalee ku baaqayaa sii yarayn dheeraad ah xaga kharashka gaadiidka basaska si loo taagero maalgelinta tacliimeed iyo si qoysas kasii badan ee xaafadaha oo idil loogu sii kordhiyo gelitaanka dugsiyada guryahooda ku dhow.

[www.bostonpublicschools.org/pathways/](http://www.bostonpublicschools.org/pathways/)